# Ogeysiinta 30-maalmood ee Qiimaynta Gobolka Oregon ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta

## DHIIRIGELINTA SINNAANTA IYO HEER SARE EE ARDAY KASTA

Oregon waxaa ka go'an in ay u diyaariso arday kasta aqoonta tacliimeed iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah guusha wixii ka dambeeya dugsiga sare. Qiimaynta gobolka Oregon ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo Xisaabta waxay si buuxda ula jaan qaadayaan Heerarka Gobolka Oregon, waxayna siiyan ardayda fasallada 3-8 iyo 11, oo ay la socdaan qoysaskooda, hal cabbir oo ah horumarka tacliinta iyo koritaanka.

## QIIMAYNTA GOBOLKA OREGON…

- **…waxaa sameeyay barayaasha Oregon** iyo dhowr gobol oo kale
- **…waxay ku dhiirigelisaa cunugaaga inuu si dhab ah u fikiro** oo uu aqoontiisa ku dabaqo xaalado kala duwan
- **…waxay dhaafaan su'aalaha kala doorashada badan**, waxayna waydiisaa cunugaaga inuu sharaxo jawaabahooda
- **…waxay u shaqaysaa sidii sawir horumarka cunugaaga** oo laga yaabo in lagu tixgaliyo qaybo kale oo macluumaad ah si loo go'aamiyo guusha waxbarashada ee cunugaaga
- **…waxay ka caawisaa dugsiyada iyo degmooyinka** inay qiimeeyaan nidaamkooda waxbaridda iyo waxbarashada, iyo sidoo kale inay ogaadaan kooxaha ardayda oo baahidooda tacliimeed aan si ku filan loo daboolin
- **…waxay ka caawisaa bulshooyinka** inay fahmaan sida wanaagsan ee dugsiyadooda dadweynaha u shaqaynayaan

**Intee in le'eg ayay cunugayga ku qaadanaysaa inuu dhammaystiro Qiimaynta Gobolka Oregon?**
Ardayda badankooda waxay ku dhameeyaan qiimayntooda ELA 1.5 ilaa 3 saacadood iyo qiimayntooda Xisaabta 1 ilaa 1.5 saacadood. Maadaama aysan jirin waqti xaddidan oo ku saabsan qiimeynta gobolka Oregon, cunugaaga wuxuu qaadan karaa ilaa inta ay u baahan yihiin inay si buuxda u muujiyaan waxay yaqaaniin oo ay samayn karaan.

**Waa maxay macnaha natiijooyinka iyo xaggee ka helaa natiijooyinka cunugayga?**
Natiijooyinka qiimaynta waxay caddeeyaan meelaha uu cunugaaga ku fiican yahay iyo meelaha lagu horumarinayo ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta. Maado kasta waxaa loo qaybin doonaa qaybo, waxayna tusi doontaa sida wanaagsan ee cunugaaga uga soo baxay qayb kasta. Qiimaynta waxay ku cabbirtaa waxbarashada ardayga miisaan oo u ogolaanaysa isbarbardhigga waqtiga oo dhan. Waaxda Waxbarashada ee Oregon waxay dejisay afar heerar gaaritaan ah oo la socda miisaankan oo guud ahaan qeexaya waxqabadka tacliinta ardayga. Dugsiga cunugaaga ayaa kula wadaagi doona buundooyinka cunugaaga dhamaadka sannad dugsiyeedka hadda ama bilowga kan xiga si ay u caawiyaan taageerada guusha cunugaaga marka ay u gudbaan fasalka ilaa fasalka.

**Maxay muhiim u tahay ka qaybgalka cunugayga?**
In kastoo aysan jirin hal qiimayn oo ka bixin karta sawir dhammaystiran horumarka cunugaaga, in cunugaaga qaato qiimaynta gobolka waxay siinaysaa barayaasha iyo maamulayaasha hal il macluumaad oo ku saabsan hababka waxbarashada ee shaqaynayo iyo halka laga yaabo in loo baahdo ilo dheeraad ah. Ka qaybgalka cunugaaga waa muhiim si loo hubiyo in dugsiyada iyo degmooyinka ay helaan agabka la beegsaday ee ay u baahan yihiin si ay u caawiyaan dhammaan ardayda inay guulaystaan.

**Goorma ayuu cunugayga imtixaanka gelayaa?**
Dugsiga cunugaaga ayaa go'aamin doona taariikhaha gaarka ah ee cunugaaga ku qaadanayo qiimaynta ee xilliga imtixaanka gobolka. Xilliyada imtixaanada ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta waxay khuseeyaan qiimaynta guud iyo qiimaynta isugaynta gobolka.

| Fasalada 3-8 | Fasalada 9-12 |
|---|---|
| 03/07/2023 — 06/02/2023 | 01/10/2023 — 06/02/2023 |

## LA SOCO MACLUUMAADKA

Booqo websaydka ee Oregon's Starting Smarter (https://or.startingsmarter.org) si aad wax badan uga barato waxa cunugaaga u baahan yahay inuu ogaado oo uu awoodo inuu ku sameeyo Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga iyo Xisaabta, si aad u aragto sanbalka su'aalaha qiimaynta , iyo inaad wax badan ka akhrido natiijooyinka imtixaanka cunugaaga. Kala xiriir wixii su'aalo ah macalinka cunugaaga ama maamulaha dugsiga.

OREGON DEPARTMENT OF EDUCATION
Oregon achieves . . . together!

# Foomka Ka-bixida OSAS ee Sanadlaha ah (2022-23)

## SHARAXA XUQUUQDA

Sharciga Oregon (ORS 329.479) wuxuu u oggolaanayaa waalidiinta/masuuliyiinta iyo ardayda qaangaarka ah* inay sannad walba ka baxaan qiimaynta gobolka Oregon ee *Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo/ama Xisaabta* iyagoo foomkan u gudbinaya dugsiga uu ardayga dhigto. Dugsiga waa inuu siiyaa arday kasta oo laga cudur daartay qiimaynta gobolka ELA-ga ama xisaabta wakhti waxbarasho oo la kormeerayo inta ardayda kale ay ku jiraan imtixaanka.

**Si aad uga baxdo OSAS qiimaynta gobolka ee Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga (ELA) iyo/ama Xisaabta, qaybtan waa in uu buuxiyaa waalidka/masuulka ama ardayga qaangaarka ah:**

Magaca Dambe ee Sharciga ah ee Ardayga: ______________________________

Magaca Hore ee Sharciga ah ee Ardayga: ______________________________

Fasalka Ardayga ee ka Diiwaangashan: ______________

Dugsiga Ardayga: ______________________________

PPS ID (Agoonsiga): ______________________________

**Fadlan dooro OSAS qiimaynta gobolka ee aad ka baxayso:**

- ☐ Farshaxanka Luuqadda Ingiriisiga
- ☐ Xisaabta

Si aad dugsiga cunugaaga uga caawiso inuu si hufan u qorsheeyo maamulka qiimaynta, fadlan foomkan u soo gudbi dugsiga cunugaaga ugu yaraan toddobaad ka hor maalinta koowaad ee imtixaanka. Ardayda is-diiwaangelisa ka dib marka uu bilowdo xilliga imtixaanka gobolka, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad ku soo gudbiso foomka 2 toddobaad gudahooda ee diiwaangelinta. Foomkan waxa uu shaqaynayaa kaliya sanad dugsiyeedka hadda socda. Waalidiinta/masuulka iyo ardayda qaangaarka ah waxaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan foom ka-bixida sanadle ah haddii ay rabaan in laga dhaafo imtixaanada guud ee gobolka.

**Waxaan fahamsanahay in markaan saxiixo foomkan inaan cunugayga ka baxsanayo OSAS qiimaynta gobolka ee ELA iyo Xisaabta sannad dugsiyeedka hadda socda oo keliya.**

Waalidka/Masuulka Saxeexa **: Taariikhda:

Waalidka/Masuulka Magaca Qoran**:

* Ardayda qaangaarka ah (da'da 18 iyo ka weyn) waxay u saxeexi karaan magacooda umana baahna saxeex waalid ama masuul.

** Ku qorida magacaaga sanduuqa saxeexa ee foomka dhijitaalka ah ayaa tilmaamaya saxeexgaaga rasmiga ah.